



## Ku soo dhawow maktabadda ama rukta kutubta

*“Qofku wuxu bartaa sidii erayo ama weedho uu wax ugu fahmi lahaa.*

*Qofku wuxu bartaa sidii uu erayo wax ugu sharrixi lahaa.*

*Dabadeed weedhaha ama erayada ayaa innaga caawiya sidii aynnu u wada noolaan lahayn“.*

BENKT-ERIK HEDIN

Ilmaha carruurta ahi marka uu yaryahay ee ay noloshu ugu horrayso wuxu maqlaa sheeko-xariiro iyo sheekooyin kale si afkiisa ama luqaddiisu ay u kobocdo. Qofku haddii uu ilmihisa kor wax ugu akhriyo ayaa ah hab fiican oo hore loogu mariyo luqadda iyo sawir-maskaxeedka ilmaha.

Ilmahaaga waxaad ka caawin kartaa sidii ay luqaddiisu u noqon lahayd mid kobocda oo wanaagsan, iyada oo ilmaha la dhagaysanayo isla markaana lala hadlayo. Wax kasta oo adiga iyo ilmuhu aad si wadajir ah u wada samaysaan wuxuu ilmahaaga ka caawinayaa sidii luqaddiisu ay hore ugu mari lahayd. Sida wax akhriska, heesidda, sheekada, wax sharraxaadda iyo ilmaha oo lala ciyaaro! Arrintaas hore ugu dhaqaaq, waayo wakhtiga ugu horreeya ayaa gogol dhig u ah luqadda.

Ilmahaaga waxaad kula hadashaa afkaaga hooyo. Haddii ilmuhu afkiisa hooyo uu si fiican u barto, taasi waxay u fududaynaysaa barashada luqadaha kale.

Rukta kutubta waxa yaallaa oo laga helayaa buugaag loogu talo galay dhammaan carruurta da'doodu kala duwen tahay. Halkaas waxa yaallaa buugaag sawiro leh oo muujinaya wax la samaynayo iyo buugaag kale oo sawiro caadi ahi ay ku yaallaan, buugaagta laxniga iyo erayada, buugaagta gabayada, buugaagta wax barashada, buugaagta sheeko-xariirada iyo sheekooyinka kale.

Rukta kutubta waxa yaallaa oo laga helayaa buugaag luqado badan ku qoran oo loogu talo galay dhammaan da' kasta oo carruurta ka mid ah.

Waxaannu aad u jecelnahay in aannu kaa caawinno buugaagta aad doonayso, wax lacag ahna maaha marka buugaagta la amaahanayo.

Waxa kale oo laga helayaa maktabadda ama rukta kutubta buugaag loogu talo galay dadka waaweyn oo ka hadlaya cudurrada carruurta ku dhaca, cilmi nafsiga carruurta, tarbiyadda ama rabbaynta carruurta iwm. Maktabadda ama rukta kutubta waxa kale oo yaallaa oo laga helayaa buugaag luqado fara badan ku qoran oo loogu talo galay carruurta iyo dadka waaweynba.

Soo dhawow!

